***JAMHUURIYADDA SOMALILAND***

## GOLAHA WAKIILADA

# Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka
# Xeer Lr. 59/2012

REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-1519/012013

DATE 09/01/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0281/012013

## Dhaqan-galka Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer Lr. 59/2012

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-19/581/2012 ee ku taariikhaysan 27/12/2012 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Somaliland Xeer Lr. 59/2012;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer Lr. 59/2012 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RECEIVED RL: 07 10/01/2013

**The Republic of Somaliland**
**House of Representatives**
**Head Quarter Hargeisa.**

**Jamhuuriyadda Somaliland**
**Golaha Wakiilada**
**Xarunta Hargeysa.**

Ref: GW/G/KF-19/581/2012 Date: 27/12/2012

**Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer (No. 59/2012).**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | **Qodobka 37^aad^** Faqradiisa 2^aad^ iyo **Qodobka 39^aad^** ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU ARKAY: - | Bahida loo qabo dhismaha Hay'ada Sirdoonka Qaranka oo Muhiim u ah dawladnimada |
| MARKUU KA DOODAY: - | Xeerka Hay'dda Sirdoonka Qaranka oo Golaha Xukuumadu soo gudbiyay. |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 59/2012** ee Golaha Wakiilada u gudbiyeen Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa 22/10/2012 |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 59/2012** ee Golaha Guurtida SL kuna taariikhaysnaa **05/11/2012** |
| MARKUU ARKAY : | In Golaha Guurtida wax ka bedal iyo kaabis ku samaynin Kuna ansixiyeen cod dhan **(52) laba iyo konton cod** Xeerka Hay'ada Sirdoonka Qaranka Somaliland Xeer **Lr: 59/2012** kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu gudbiyeen. |

## WUXUU

Golaha Wakiilada JSL halkan ugu soo Gudbinayaa Madaxwaynaha JSL Xeer Lr: **59/2012** Xeerka Hay'ada Sirdoonka Qaranka Somaliland si uu uga guto waajibaadkiisa Dastuuriga ah.

**ALLAA MAHAD-LEH**

*Cfrisaaq Siciid Ayaanle*
*Xoghayaha. Guud ee Golaha Wakiilada*

*Baashe Maxamed Faarax*
*K/simaha Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ahna G/Xigeenka 1aad*

# GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkey:-** Qodobka 37aad Faqradiisa 2aad iyo Qodobka 39aad ee dastuurka JSL.

**Markuu arkey: -** Bahia loo qabo dhismaha Hay'ada Sirdoonka Qaranka oo Muhiim u ah dawladnimada

**Markuu Ka doodey: -** Xeerka Hay'dda Sirdoonka Qaranka oo Golaha Xukuumadu soo gudbiyay.

Wuxuu soo saarey **Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer Lr. 59/2012**

# QAYBTA 1aad

## Qodobka 1aad
## Erey-Bixinta Xeerka

Xeerkan Gudihiisa waxa ereyadan loola jeedaa:

***Hay'adda:-*** Hay'adda Sirdoonka Qaranka (National Intelligence Agency "NIA").

***Agaasimaha Guud:-*** Agaasimaha Guud Hay'adda Sirdoonka Qaranka.

***Xubin:*** qof kastā oo ka mid ah Hay'adda Sirdoonka Qaranka.

***Xog qarsoodi ah:-*** xog dabeecad ahaan ama qiimo ahaan xasaasi ah, taas oo bixinteeda ama sheegiddeeda aan la ogolaani ay khatar ku tahay ilaalinta amniga iyo danta qaranka.

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa **Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka.**

## Qodobka 3aad
## Aasaasidda Hay'adda

Xeerkan waxa lagu aasaasay **Hay'adda Sirdoonka Qaranka** (National Intelligence Agency "NIA") oo yeelanaysa shakhsiyad qaanuuni ah.

## Qodobka 4aad
## Madaxbanaanida Hay'adda

Hay'addu waxay hoos tagtaa Madaxweynaha JSL, waxaanay u gudanaysaa xilka iyo waajibaadkeeda si madaxbanaan oo Xeerka Waafaqsan .

## Qodobka 5aad
## Ujeeddooyinka Hay'adda

1. Ujeeddooyinka loo aasaasay Hay'addu waxa ka mid ah:
    a. Raadinta,Xuuraaminta (intelligence) xogta iyo wararka.
    b. Ka saadaalinta iyo dabagalka (monitoring) waxkasta oo waxtar u leh sugida iyo xasiloonida amniga qaranka.
    c. Ka hortaga shirqoolada af iyo adinba kaga iman kara cadawga gudaha iyo dibada oo loola jeedo in lagu wax yeeleeyo laguna wiiqo haybada, sumcada iyo harumarka qaranka wejikasta ama meelkasta oo ay ku abaaran yihiin. Kuwaasi oo marka war la hello kadib si aqoon iyo digtoonaan cuskan loo maarayn karo loona furdaamin

karo ama looga hor tegi karo inta aanay iman hadii ay markaa ciqaab mudantahayna la *mariyo.*

d. Ka soo warbixinta meel kasta guddo iyo dibadba iyo cid kasta oo ay u aragto inay ku lug leedahay ama wado dibindaabyo qaran dumisnimo, curyaamin iyo wax kasta oo wax yeelo ku ah habsami u socodka hawlaha qaranka, iyagoo markaa diyaarinaya habkii ama talaabadii ku haboonayd ee wax lagaga qaban karo arrimahaas.

2. Ka turjumidda, war-bixinta iyo u kuur gelidda guuxa iyo dareenada shacbiga iyo meel kasta oo ay tabasho ka jirto iyadoo sida ugu haboon warbixin buuxda uga siinaysa Madaxweynaha arrimahaas si uu go'aanno iyo xal uga soo saaro

## QAYBTA 2aad

### Qodobka 6aad
### Awoodda Hawlgalka Dhulka,Badda iyo cirkaba

Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ka hawlgasho dhulka,badda iyo Cirka Jamhuuiryadda Somaliland ee ku gudo-jira xuduudihiisa caalamiga ah, waxa kale oo ay ka shaqayn kartaa meel kasta oo ka baxsan xuduudaha dalka, iyadoo la eegayo danta qaranka, marka loo baahdo."

### Qodobka 7aad
### Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda

Hay'addu waxay leedahay xilalka iyo waajibaadka hoos ku qoran:

1. Ururinta, xuuraaminta, lafo-guridda iyo hufidda xogta ay hesho(intelligence service).
2. Dabagalka (monitoring) iyo la socodka xaalada amniga guud ee qaranka iyo xasiloonida dalka iyo dibadaba;
3. Ka warbixinta khataraha jira ama ku soo fool leh amniga qaranka gudo iyo dibedba;
4. ka saadaalinta iyo ka warbixinta meel kasta oo ay ka iman karto khatar iyo waxyeelo qaranka ku iman karta, ka hortaga iyo gacan ku qabashada falal kasta iyo xad gudub kasta oo ah danbiyo, shirqoolo iyo hadimooyin lagu wax yeelayn karo qaranka.
5. dabagalka iyo raadinta xog kasta oo la xidhiidha danbiyada abaabulan iyo kuwa argagixisada.
6. Taageeridda iyo gacansiinta laamaha Dawladda ee qabilsan amniga iyo Dhamaan meel kasta oo kale oo ay waxtar ka geysan karaan.
7. La socodka iyo dhaqdhaqaaqa Hay'adaha shisheeye.
8. Tira koobka xog u haynta dublimaasiyiintooda (Diplomatic missions).

9. Tiro koobka ajanebiga wadanka ku sugan iyo isla markaana sugida amaanka cida ku xusan xarfaha G & i.

10. Ka hortaga dacaayadaha (counter propaganda) lidka ku ah haybada,sumcada iyo sharafta qaran nimada JSL.

11. La socodka qalabyada warbaahinta, qoraalada iyo meel kasta oo ay ku wajahanyihiin iyo in la hubiyo ujeedooyinka ay xanbaarsanyihiin iyo waxkasta oo ku duugan (publication press and propaganda).

**Qodobka 8aad**
**Awooddaha Hay'adda**

Hay'addu si ay u gudato xilkeeda iyo waajibaadkeeda waxay leedahay awoodaha soo socda:

1. In mar kasta oo ay ka war-hesho, ama sabab macquula ah awgeed ku rumaysato in la qorshaynayo fal-dembiyeed, ay wargeliso hay'adaha qaabilsan ka-hortagga dembiyada.
2. Xubnaha Hay'addu waxay qaadan karaan hub fudud, si ay isugu difaacaan, Si waafaqsan Xeerka Hubka fudud.
3. Hadii ay timaado xaalad degdeg ah (emergence case) waxay awood u leeyihiin inay halkeeda wax kaga qaban karaan iyaga oo aan cidna u marin isla markaasna la kaashanaya hay'addaha nabad-gelyada waxaanay la wareegi karaan qalabkasta oo loo adeegsado danbiyaadaas.

**Qodobka 9aad**
**Qaab-dhismeedka Hay'adda**

Hay'addu waxay yeelan kartaa qaab-dhismeedkeed ka kooban Agaasime guud, Agaasime xigeen iyo waaxo, qaybo ama unugyo, oo lagu soo saarayo xeer Madaxweyne.

**Qodobka 10aad**
**Shuruudaha Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeenka Agaasimaha**

Qofka loo magacaabayo Agaasimuhu waa:-

a. In uu yahay muwaadin u dhashay Somaliland.

b. In uu haysto shahaado Jaamacadeed , leeyahayna waaya-aragnimo maamul iyo khibrad aqoon shaqada loo igmaday oo mudadeedu aanay ka yarayn 5-10 sano.

c. In aanuu ku dhicin xukun ciqaabeed oo kama danbays ah oo ugu yaraan saddex sannadood oo xadhig ahi,

## Qodobka 11aad
## Xilka Agaasimaha

Agaasimuhu wuxuu:-

a. Mas'uul ka yahay maamulka Hay'adda.
b. Uga warbixiyaa Madaxweynaha shaqada Hay'adda.
c. U gudbiyaa Madaxweynaha xogta iyo war kasta oo taabanaya amniga Qaranka.
d. U gudbiyaa Hay'addaha kale ee amniga Qaranka xogta la xidhiidha amniga.
e. Mas'uul ka yahay oo Maamulaa qul-qulka xogta la helay.
f. Mas'uul ka yahay in uu la yimaado hab uu:-
   i. ku hubinayo in Xubnaha Hay'addu xilkooda u gudanayaan si hagar la'aan ah.
   ii. kaga hortegayo in xogta hay'addu debedda u soo baxdo.
   iii. ku ilaaliyo inaan la sheegin isha xogaha.
   iv. ku ilaaliyo in aan la sheegin xubnaha qarsoodiga ah ee Hay'adda.
   v. kaga hortagayo gelitaanka ogolaansho la'aanta ah ee Xarumaha iyo goobaha Hay'adda.

## Qodobka 12aad
## Xilka Agaasime Ku-xigeenka.

1. Agaasimuhu markuu maqan yahay ama aanu u gudan karin xilkiisa sabab kasta ha ahaatee waxaa dhamaan hawshiisa fulinaaya agaasime ku- xigeenka.
2. Agaasime ku-xigeenku wuxuu qaban karaa xilkasta oo agaasimuhu u igmado.

## Qodobka 13aad
## Magacaabista iyo Xil ka qaadista Agaasimaha

Madaxweynaha ayaa leh awoodda magacaabista iyo xil-ka-qaadista Agaasimaha.

## Qodobka 14aad
## Qaabka Shaqo Qorista, Mushaharka iyo Gunnooyinka Xubnaha

Qaabka shaqo qorista, mushaharka iyo gunnooyinka Xubnaha Hay'adda waxa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.

## Qodobka 15aad
## Warqadda Aqoonsiga

1. Agaasimuhu waxa uu siinayaa Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda warqadda aqoonsiga (ID Card).

2. Qaabka qoraalka warqadda aqoonsiga, waxa qeexaya Agaasimaha oo ku soo saaraya qaabkeeda faafinta rasmiga ah.

3. Xubintu waa in ay tusto warqadda aqoonsiga qofka ay ku fulineyso awoodaha ku xusan xeerkan.

## QAYBTA 3aad
## Fal-dembiyeedyada iyo Ciqaabaha

### Qodobka 16aad
### Falalka Ka Reebban Xubnaha Hay'adda

Xubin kasta oo ka tirsan Hay'addan waxaa ka reebban :

a. In ay si toos ah iyo si dadban toona uga qayb-qaadato dhaqdhaqaaq xisbi/urur siyaasadeed.

b. In ay si aan xeerka waafaqsanayn u gasho ama u baadho goob gaar loo leeyahay, amaba u qabato hanti hab aan waafaqsanayn xeerkan.

c. Xubinta ku gefta faqradda "a" ee qodobkan waxa abaalmarinteeda loo raacayaa Xeer-Hoosaadka Hay'adda.

d. In ay qof muwaadin ah ku xadgudbaan xorriyadiisa aasaasiga ah ee distuuriga ah iyad oo looga faa'iideysanayo dano siyaasadeed"

e. Xubinta lagu helay inay ku geftay faqradda "b" ee qodobkan, waxa lagu xukumayaa xadhig u dhexeeya 6-bilood ilaa 2-sanadood iyo ganaac aan ka badnayn 2,000,000/= (laba milyan oo SL Shilling ah).

### Qodobka 17aad
### Bixinta Sirta

1. Xubin kasta oo ka tirsan Hay'adda oo iyada oo ogolaansho ka helin Agaasimaha Hay'adda sheegta, faafisa, daabacda ama si uun uga dhigta wax la ogyahay;-
   a. Aqoonsiga qof Hay'adda u ah il-wareed .
   b. Xubin Hay'adda ka tirsan oo ku hawlan hawl qarsoon.
   c. Xog hay'addu heshay oo xaasaasi ah.

2. Waxa lagu xukumayaa xadhig u dhexeeya 6 ilaa 10 sano; haddii xogta la bixiyey ay Qaranka ku keentay khasaare, waxa xubinta bixisay lagu xukumayaa xadhig u dhexeeya 10 ilaa 20 sanno.

### Qodobka 18aad
### Gelidda Goobaha Hay'adda

Qof kasta oo:

a. Gala dhulka ama goobaha Hay'adda,
b. sawir ka qaata dhulka ama goobaha Hay'adda,

isaga oo aan ogolaansho ka haysan Hay'adda, isla markaana si macquul ah loogu rumaysan karo in gelitaanka goobta ama sawir ka-qaadisteeda laga lahaa in lagu waxyeeleeyo hay'adda ama qaranka, waxa uu galay dembi, waxaana lagu xukumayaa 2 ilaa 3 sanadood.

**Qodobka 19aad**
**Dhaarta**

1. Agaasimaha iyo Xubin kasta oo ka tirsan Hay'addu intaanay shaqada gelin waxay marayaan dhaartan: *"Waxa igu Wallaahi ah, oo igu Bilaahi ah, inaan daacad u noqdo Qaranka Somaliland, xilkaygana u guto si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerkan".*
2. Agaasimaha Hay'adda Madaxweynaha hortiisa ayaa lagu dhaarinayaa, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamada sare.
3. Xubnaha kale ee Hay'adda waxa lagu dhaarinayaa Agaasimaha hortiisa.

**Qodobka 20aad**
**Wada Shaqaynta Waajibka ah**

Qof kasta oo deggan wadanka gudihiisa, marka laga reebo diblomaasiyiinta shisheeye, waxa ku waajib ah in uu la shaqeeyo xubnaha Hay'adda ee gudanaaya wajibaadkooda shaqo.

**Qodobka 21aad**
**Miisaaniyadda Hay'adda**

Hay'adda waxaa miisaaniyada Qaranka looga qoondaynayaa miisaaniyad ku filan oo ay ku fuliso waajibaadkeeda.

**Qodobka 22aad**
**Xeer-nidaamiye**

Madaxweynuhu, ka dib marka uu la tashado Agaasimaha Guud, waxa uu soo saarayaa Xeer-nidaamiye lagu dhaqan-gelinayo Xeerkan.

**Qodobka 23aad**
**Dhaqangalka Xeerka**

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu saxeexo Madaxweynuhu, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Baashe Maxamed Faarax |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL | Ku-simaha Gudoomiyaha, ahna Gud Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada JSL. |